



## Guddiga PPS waxay xulatay hoggaamiyaal cusub

**Julia Brim-Edwards waxaa loo doortay guddoomiye; Julie Esparza Brown, Rita Moore waa guddoomiye ku-xigeeno**



Labo xubnaha cusub ee guddiga la doortay iyo hal xubin oo hada ka mid ah Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa qaadan doona doorar hoggaamineed ka dib kulan gaar ah oo guddigu yeelatay Luulyo 7.

Julia Brim-Edwards, a maamule sare ka ah Nike oo guddiga u soo shaqeeyay 2001-2005, ayaa si buuxda loogu doortay in uu noqdo guddoomiyaha guddiga. Brim-Edwards, oo soo dhigatay dugsiyada dadweynaha intii ay ku soo koraysay degaanka Mt. Tabor, iyada oo sanado badan ahayd waalid wax u dhaqdhaqaaqda isla markaana tabaruc samaysa.

Iyada oo laga tegayo sidii caadadu ahayd, guddigu waxay doorteen labo xubnood si ay u wadaagaan xilalka guddoomiye ku-xigeenimada – Rita Moore, oo la doortay Maajo, iyo Julie Esparza Brown, oo dhexda kaga jirta muddadeedii u horeysay ee guddiga ay ka tirsan tahay.

Moore, sidoo kale ah waalid wax u dhaqdhaqaaqda, waa qof falanqeysa siyaasadda waxbarashada. Esparza Brown waa macalimad jaamacadeed oo waxbarashada gaarka ah ka dhigta Jaamacadda Gobolka Portland “Portland State University”.